



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

2017 Arts in Parks (AIP, Fanka Beeraha) Program Grant Guidelines (Tilmaamaha Deeqda Barnaamijka)

Office of Arts & Culture (ARTS, Xafiiska Fanka iyo Hiddaha) wuxuu ku hawlan yahay iskaashi uu la sameeyo Seattle Parks and Recreation (PARKS, Beeraha iyo Nasashada Seattle) si loo kordhiyo fanka iyo munaasabadaha bulshada ee la xariira beeraha magaalada. **Arts in Parks Program (AIP, Barnaamijka Fanka iyo Beeraha)** waa fursad ay magaalada ku biiriso hawsha hiddaha firfircoon ee laga fulliyo iyo fulliyaan bulshadaha kala duwan ee ka jira Seattle.

Macluumaadka: la xariir Jenny Crooks, Project Manager (Maamulaha Mashruuca), telefoonka (206) 684-7084, jenny.crooks@seattle.gov

Arjiga http://www.seattle.gov/arts/put-the-arts-in-parks	Goorta Ugu Dambeyso: Arbaco, Oktoobar 19, 2016, 11 p.m. PST
Tababarada: Arbaco, Sateembar 7, 2016, 5:30-7 p.m. 2100 Building, Community Room A 2100 24th Ave S, Seattle, WA 98144 Sabti, Sateembar 10, 2016, 11:30 a.m.-1 p.m. Green Lake Library 7364 East Green Lake Dr N, Seattle, WA 98115 Isniin, Sateembar 19, 2016, 5:30-7 p.m. Highpoint Library 3411 SW Raymond St, Seattle, WA 98126	
Xaq u Yeelashada Qof ahaan fanaaniinta, guddiyada fanka xaafadda iyo kooxaha deegaanka ee ku saleysan bulshada waxay u leeyahiin xaq. Ururada iyo shakhsiyaadka fanaaniinta mattasha bulshadaha sida yar loogu adeego sida kuwa dakhliga yar, bulshadaha muhaajiriinta iyo qaxootiga, iyo bulshada midabeysan waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay soo dalbadaan. Mashaariicda la soo jeediyo waa in la soo bandhigo inta u dhexeyso Abriil 1 iyo Diseembar 15, 2017.	
Maalgelinta Arjiileyaasha waxay codsan karaan ilaa \$7,200 si ay isaga bixiyaan kharashka toos ugu baxa mashaariicda.	

Kor Ka Eegidda Barnaamijka

Barnaamijkaan wuxuu taageeraa guddiyada fanka xaafadda, kooxaha ku saleysan bulshada, iyo fanaaniinta qof ahaan raadiya in ay beeraha Seattle ee ku yaal xaafadaha sida yar loogu adeego iyo dhaqaale ahaan cariiriga ku jiro iyaga ku kiciyaan damaashaad cusub iyo kuwo soo jiray ama munaasabado horumariya fanka iyo ka qeybgalka hiddaha, xusaan kala duwanaantena, dhisaan xariirka bulshada, iyo beeraha ku nooleeyaan fanka iyo hiddaha iyaga oo la xariira bulshadaha sida yar loogu adeego sida kuwa dakhliga yar, bulshadaha muhaajiriinta iyo qaxootiga, iyo bulshadaha midabeysan. Beeraha Magaalada Seattle ee ku yaal bartamaha magaalada hoose waxaa la siiyaa hanti gaar ah ay ku kiciyaan beeraha, xaq uma laha maal gelinta Arts in Parks.

Xaq u Yeelashada iyo Sharuudaha

Arjiilaha waa in uu:

- qof ahaan ahaado fanaan, guddiga fanka xaafadda ama koox ku saleysan bulshada xaafadda. Ururada iyo shakhsiyaadka fanaaniinta mattasha bulshadaha sida yar loogu adeego sida kuwa dakhliga yar, bulshadaha muhaajiriinta iyo qaxootiga, iyo bulshada midabeysan waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay soo dalbadaan.
- haysto nambarka Federal Tax ID (Aqoonsiga Canshuurta Federaalka ID) iyo daggan yahay magaalada Seattle. Kooxaha soo dalbada loogama baahna in ay haystaan 501(c)(3) kuwa aan fa'iidada doonin mana looga baahna in ay adeegsadaan qof uga shaqeyo dakhliga.

Mashruuca waa in uu:

- leeyhay qeyb muhiim ah oo ka kooban fanka iyo hiddaha,
- yahay lacag la'aan una furan yahay dadweynaha,
- haysto ceymis,
- fursad siiyo fanaaniinta iyo bulshadaha aan sida buuxdo loo mattalin,
- raaco oraahda ujeedada PARKS (fiiri hoos),
- iyo waa in laga fulliyo magaalo ku taal Seattle inta u dhexeyso Abriil iyo Diseembar 2017.
 - *(fiiri liiska ku lifaaqan ee ku saabsan beeraha la jecel yahay bogga 4aad).*
 - Munaasabadaha ka dhaca Magaalada Hoose ama City Center Parks (Beeraha Bartamaha Magaalada) xaq **UMA** laha maal gelintaan. Fadlan fiiri liisnaan ku saabsan beeraha ku yaal magaalada hoose bogga 5aad

Seattle Parks and Recreation Mission Statement (Oraahda Ujeedada Beeraha iyo Nasashada Seattle): Seattle Parks and Recreation waxaa laga helaa fursado ku wanaagsan soo dhaweynta iyo ammaanka lagu cayaaro, wax lagu barto, lagu qorsheeyo laguna dhiso bulshada, iyo horseed mas'uul ah ka horumariso dhulka.

Waxaad barnaamijkaan u soo gudbin kartaa oo keliya hal arji halkii sanno. Kooxaha loo ogol yahay waxay arjiyada la xariira mashaariicda ay rabaan u diri karaan AIP (Arts in Parks) iyo [Neighborhood & Community Arts \(NCA, Fanka Xaafadda iyo Bulshada\)](#) hase ahaatee mashaariicda waa in ay la kulmaan tilmaamaha u gaaarka ah iyo xaq u yeelashada. Haddii hal mashruuc uu xaq u yeesho maal gelinta AIP iyo NCA, arjiga waxaa loo gudbin karaa labada barnaamij hase ahaatee wuxuu maal gelinta ka qaadan doonaa hal keliya (ma aha labada barnaamij).

Maalgelinta

Ururada la maal geliyo waxay qaadan doonaa hal (1) sanno taageerada maal gelinta AIP (munaasabadaha 2017) oo lagu bixiyo: khidmadaha fanaanka, khidmadaha suuq geynta iyo horumarinta, kharashka ku baxa maamulka mashruuca iyo qofka, saadka, kirada qalabka ama kharashka kale ee la xariira soo saarka, ruqsadaha loo baahan yahay ([fiiri warqadda ruqsadda](#)) iyo xisaab aan ka badneyn 10% oo la xariira kharashka raashinka. Hantida looma isticmaali karo qaaraan, haddiyad, kharashka maamulka ururka aan sida toosan ula xariirin mashruuca ama iibsiga qalabka. Barnaamijkaan, ma laha maalgelin qeyb ah. Arjiileyaasha waxay dalban karaan heerarka maal gelinta

soo socda. Kooxaha muujiya in ay leeyahiin taariikh la xariirta soo saarka munaasabada waxay dalban karaan maal gelinta heerka \$2,400 iyo ka badan:

Heerarka Maalgelinta:

- \$1,200 (Ma u baahna diiwaan la xariira soo saarka munaasabadda.)
- \$2,400
- \$4,800
- \$7,200

Deeqdaan ma maal gelin doonto

- dadaalka qaaraanka;
- haddiyadaha;
- kharashka maamulka ururada aan toos ula xariirin mashruuca;
- iibsiga qalabka ama brograamyada;
- kharashka la xariira raashinka in ka badan 10% ka la ogol yahay.

Habka Qiimeynta

Ujeedooyinka Arts in Parks Program (AIP) waxaa loogu talagalay in lagu taageero lana kordhiyo jiritaanka fanka meelaha dadweynaha, gaar ahaan beeraha dadweynaha xaafadda, si loo kordhiyo ka qeybgelinta barnaamijka bulshada taariikh ahaan sida yar loogu adeego, iyo si loo taageero loona kordhiyo tirada munaasabada wanaagsan, u roon qoyska ee dhisa bulshada, xusa kala duwanaanta, iyo horumariya ka qeybgelinta fanka iyo hiddaha. Soo jeedinta loo gudbiyo barnaamijka waxaa lagu qiimeyn doonaa habka soo socda:

- **Tayada Mashruuca:** Xariir cad, si wanaagsan looga fakaray, dhab ah, oo lala leeyahay bulshada, taasi waxay horumarisaa ka qeybgalka fanka iyo xariirka bulshada.
- **Saamaynta Bulshada:** Qorshaha mashruuca wuxuu sharaxaa dadaal macno leh oo lagu abuurto ka-qeybgalka bulshada laguna gaaro dadweynaha kala duwan iyo kuwa sida yar loogu adeego. Ururada iyo shakhsiyaadka fanaaniinta mattasha bulshadaha sida yar loogu adeego sida kuwa dakhliga yar, bulshadaha muhaajiriinta iyo qaxootiga, iyo bulshada midabeysan waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay soo dalbadaan.
- **Suurtogalka:** Ururka/qofka wuxuu leeyahay raad la caddeeyay in uu soo bandhigi karo middaan iyo/ama munaasabadaan iyo/ama awood la caddeeyay uu ku soo saaro munaasabadda (haddii uu codsanaayo 2,400 ama ka badan); caddeyn in bulshada ku lug leedahay iyo taageero; iyo miisaaniyad dhab ahaan cad oo loo sameyay munaasabadda.
- **Beeraha Muhiimka ah:** Hormarinta waxaa la siin doonaa mashaariicda laga fulliyo mid ka mid ah ama in ka badan beeraha la jecel yahay ee lagu tilmaamay liiska ku yaal bogga 3aad, ee laga yaabo in ay si gaar ah uga fa'iideystaan isticmaalka badan ay bulshada ka samayso.

Jadwalka:

Guddi madax banaan oo ka kooban fanaaniin, bulsho, iyo wakiilada Seattle Parks (Beeraha Seattle) ayaa fiirin doono iyo qiimeyn doono arjiyada sida waafaqsan habka barnaamijka kaddibna ku tallin doono maal gelinta.

Ogeysiiska maal gelinta waxaa la soo saari doonaa dhamaadka Janaayo 2017.

Dhamaystirida arjiga internetka

- Samee ama casriyeey wararka adiga kugu saabsan <https://www.culturegrants-wa.org/>
- Internetka ka buuxi arjiga adiga oo si buuxda uga jawaaba dhamaan su'aalaha sheekada.

Wajibbaadka saaran qaateyaasha qandaraaska

Haddii mashruucaada loo soo xullo maal gelinta, waa in aad la kullantid sharuudaha hoos ku qoran.

- Si loo bixiyo kharashka, waxaa loo baahan doonaa shatdiyada ganacsiga magaalada iyo gobolka (UMA baahnid in aad qaadatid shattiga ganacsiga si aad u dalbatid). Si loo helo lacag bixinta ugu dambeyso, shakhsiyaadka la siiyay hantida Office of Arts & Culture waa in ay haystaan shattiga ganacsiga Seattle iyo nambarka Washington State Unified Business Identification (UBI, Aqoonsiga Ganacsiga La Mideyay) ee Gobolka Washington. Waxaad miisaaniyadaada ku soo darri kartaa kharashka ku baxa qaadashada shatdiyada ganacsiga.
- Qaateyaasha qandaraaska waxay saxiixi doonaan heshiis ay ku ballan qaadaan in ay mashruucoda ku soo saaraan hawlo kana mid ah taariikhda ay ku talo jiraan iyo goobta beerta lagu qaban doono bandhigga dadweynaha. Waxaa jiri doono Contract Meeting (Shirka Heshiiska) oo leyska dhaafi karo loona qabto qandaraasleyaasha cusub ee la maal geliyay Febraayo 2017.
- Qaateyaasha qandaraaska waxay mas'uul ka noqon doonaan in ay la shaqeyaan Seattle Parks and Recreation si ay u buuxiyaan una gudbiyaan warqadaha ruqsadda loo baahan yahay ugu dambayn Maarso 15.
- Qaateyaasha qandaraaska waxay mas'uul ka noqon doonaan in ay mashruucoda u qaadaan Event Liability Insurance (Ceymiska Khasaarada Munaasabadda).
- Qaateyaasha qandaraaska waxay mas'uul ka yahiin bixinta dhamaan canshuurta lagu dabaqi karo. Waqtiga la galo heshiisyada qandaraaska, waxaad u baahan tahay in aad dhamaystirtid warqadaha ku habboon.
- Qaateyaasha qandaraaska waxay ballan qaadeen in ay Office of Arts & Culture and Seattle Parks & Recreation, ku aqoonsadaan qoraalada la daabaco, meediyaha bulshada, iyo calaamadaha ay arki karaan bulshada ama siyaabo kale oo ku habboon mashruuca.

Tallooyinka:

- Casriyey ama dhamaystir diiwaan gelintaada aasaasiga adiga oo isla markiiba booqda <http://web1.seattle.gov/seastats/doServices.aspx>.
- Waqti hore sahmi arjiga internetka, khaas ahaan haddii aad tahay arjiile marka kowaad.
- Fiiri tilmaamaha, hubso xaq u yeelashadaada kaddibna akhri sanduuqyada tilmaanta
- Tag kullanka tababarka/macluumaadka.
- Horay u bilow in aad qortid ama taxdid qoraalka arjigaada. Waxaa dhici karto in aad marka hore ku qortid warqad gaar ah si aad si cad u aragtid sheekadaada oo idil.
- Hubso in aad keydsatid iyo in aad dib u akhrisid shaqadaada ka hor inta aadan gudbinin.
- Horay u wac maamulaha mashruuca ka hor inta aan la gaarin taariikhda ugu dambeyso. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku kaalmeyno, hase ahaatee kaalmada daqiiqada ugu dambeyso waa kooban tahay taasoo ugu wacan waqtiga.
- Waqti hore soo gudbi bacdamaa aad u baahan kartid waqti aad ku saxdid khaladaadka ku jira arjiga.
- Mar labaad hubso miisaaniyadaada iyo hubso in dakhliga la'eg yahay kharashka.
- Soo koob iyo is habeey. Xubnaha Guddiga waa in ay akhriyaan iyo waa in ay qiimeyaan dhowr darsan oo arji ah,

LIISKA BEERAHA LA JECAL YAHAY

Fadlan booqo [bogga internetka](#) Seattle Parks kaddibna adeegso Park Finder (Raadinta Beerta) si aad u aragtid macluumaad badan oo ku saabsan beeraha ku qoran liiska.

BARTAMAHA

- Cal Anderson Park
- Denny Park
- Blanche Lavizzo Park
- First Hill Park
- Judkins Park
- Flo Ware Park
- Pratt Park
- Powell Barnett Park

WAQOOYI

- Ballard Commons Park
- Lake City Mini-Park
- Mineral Springs
- Salmon Bay
- University Playfield

KOOFUR BARI

- Hutchinson Park
- John C. Little Park
- Othello Park
- Pritchard Beach

KOOFUR GALBEED

- Delridge Park
- Duwamish Waterway Park
- Roxhill Park

Beeraha soo socda xaq UMA laha maal gelinta Arts in Parks:

2100 Westlake
Alaskan Way Blvd
Bell Street BLVD
Belltown P-Patch
Cascade Playground
City Hall Park
Denny Regrade OLA
Donnie Chin International Children's Park
Elliott Bay Bike Path
Freeway Park
Hing Hay Park
Kobe Terrace
McGraw Square
Myrtle Edwards
Occidental Square
Pier 62/63

Pioneer Square Park
Plymouth Pillars Park iyo Off Leash Area
Prefontaine Place
South Lake Union
Tilikum Place
Union Station Square
Victor Steinbrueck
Waterfront Park
Washington Street Boat Landing
Westlake Square
Westlake Park

Siyaasadaha Maalgelinta ARTS

Waxay tixgelisaa hiddaha kala duwan

ARTS waxay tixgelisaa iyo waxay raadisaa kala duwanaanta hiddaha iyo muuqaalka xagga barnaamijyadeeda iyo maamulka, waxayna u adeegsataa:

- Hubinta ka qeybgelinta hiddaha kala duwan xagga gaarista go'anada iyadoo si gaar ah loo fiiriyo kala duwanaanta isirka xagga xulidda guddiga, qorista shaqaalaha iyo magacaabidda Guddiga.
- Soo saaridda siyaasadaha, warqadaha iyo hababka meesha ka saara waxyaabaha ku dadban ka-qeybgalka.
- Dhiiri gelinta ururada fanka in ay balaariyaan ka-qeybgelinta dhamaan dhinacyada adeegga ujeedadooda.
- Aqoonsiga baahida iyo fursadaha fanka ee ka jira gudaha fanka si looga qeybgeliyo hiddaha kala duwan iyo dadweynaha sida yar loogu adeego iyo fanaaniinta.

Ballanka Sinaanta Isirka

Office of Arts & Culture wuxuu xaqiijinaa in

- Dhamaan dadka, hiddahooda, iyo fankooda ku biiriyaan macnaha iyo fahamka dadnimadena, bulshadena iyo qaaradana, sidaas darteed loo baahan yahay in la sharfo lana xusso.
- Fanaaniinta, fankooda, habka ay ku shaqeyaan, iyo ururada ay sameyaan iyo taageeraan waxay kaalin gaar ah ka cayaaraan in ay marqaati ka noqdaan iyo dhiiri geliyaan iyo xiiladaha lagu tirtiro sinaan la'aanta iyo cadaalad darrada.
- Siyaasadaha, dhaqanka iyo hababka, ha ahadeen kuwo lagu talogalay iyo kuwo aan lagu talogelin, waxay dhalliyeen in aan si siman loo helin waxbarashada, guryaha, gaadiidka, raashiinka caafimaadka u roon, meelaha dadweynaha, iyo ilo kale oo tiro badan oo loogu talogalay Afrikaanka, Madowga, Latino(a), Hisbanik, Aasiyaan, Jasiiradda Basifigga, Carabta iyo bulshada Dhalladka Mareykanka iyo fanaaniinta. Helitaankaan ku dhisan siistemka, aan sineen xagga fursadda wuxuu bulshada midabeysan ku dhalliyay natiijado jiilal ku dhisan caddaalad darro iyo sinaan la'aan. Natiijada waa sasaan weli sii socda oo ku dhisan cabburin iyo hanaan ku dhisan isirka.
- Sinaan la'aantaan ka jirta bulshada waxay ka muuqdaan barnaamijyada, siyaasadaha iyo dhaqanka ururo badan, sida kuwa ka shaqeeyo bulshada fanka iyo hiddaha. Sidaas darteed, si loo aburo bulsho ku dhisan sinaan, maal geliyeyasha, ururada fanaaniinta, iyo fanaaniinta waa in ay ku dhaqaaqaan falal lagu baddalo siyaasadahena, dhaqankena, dhismahena iyo sharciyadana.

Office of Arts and Culture wuxuu aaminsan yahay in wax ka qabashada cadaalad darrada ay bulshada midabeysan u tahay qeyb muhiim si loo gaaro sinaan.

Sidaas darteed, Office of Arts and Culture, oo kaashanaayo Office for Civil Rights (Xafiiska Xuquuqda Madaniga), wuxuu ballan qaaday in uu u horseedo dhaqanka ugu fiican si loo kala furfuro, loogana shaqeeyo si loo baro ururada fanka iyo hiddaha arrimaha ku saabsan adeegsiga isirka hay'adaha iyo dhismaha. Waxaan ballan ku qaaday in aan wax ka qabano iyo kordhino dareenka bulshada ku baahsan kuna saabsan sinaan la'aanta si aan, anaga oo kaashaneyna iskaashatada hiddaha iyo bulshada, uga wada shaqeyno hammiga sinaanta isirka.

(Oraahdaan waxaa iftiimiya oo laga soo qaatay Grantmakers in the Arts' Racial Equity in Arts Philanthropy (Deeq Sameeyeyaasha Fanka Sinaanta Isirka Samafalka Fanka): Ujeedada Oraahada.)

Qoraalada arjiga waa macluumaad loogu talagalay dadweynaha

Qoraalada arjiga loo gudbiyo Office of Arts & Culture waxay noqdaan macluumaadka dadweynaha. Xubnaha dadweynaha waxay heli karaan koobi kaddib marka ay si rasmi u codsadaan. Qoraalada waa wax ay dadweynaha heli karaan sida waafaqsan Washington State Public Disclosure Act (PDA:RCW 42.17, Sharciga Kashifaadda Dadweynaha Gobolka Washington) Si aad u codsatid koobiga sharciga, la xariir State of Washington Code Revisers' Office (Xafiiska Baddalaadda Xeerka Gobolka Washington) ee Olympia, telefoonka (360) 786-6777.

Lama ogola takoor lagu sameeyo mashaariicda City (Magaalada) maal geliso

Arjiileyaasha maaliyadda ka qaata Office of Arts and Culture waa in ay u hoggaansamaan Seattle Municipal Code 20.44 (Xeerka Dawladda Hoose Seattle), ee la xariira ka hortagga takoorka heshiisyada Magaalada, iyo Cutubka 5.44, ee la xariira sharuudaha bixinta shattiyada. Qoraalka dhamaystiran xeerarka Magaalada waxaa laga heli karaa xafiiska Karaaniga Magaalada iyo Seattle Public Library (Maktabka Dadweynaha Seattle).

Americans with Disabilities Act (Sharciga Mareykanka Qaba Itaal Darrida) waxaa lagu dabaqaa mashaariicda Magaalada maal geliso

Americans with Disabilities Act (ADA, Sharciga Mareykanka Qaba Itaal Darrida) waa sharci federaal oo hubiya in kuwa awoodooda duwan tahay helaan adeegyo iyo fududeyn. Office of Arts and Culture wuxuu tixgeliyaa baahida dadka qaba awoodda kala duwan, wuxuuna raadiyaa in arjiileyaasha, ka qeybgaleyaasha iyo dhamaan dadka daneeya helaan macluumaadka ku saabsan qodobada Americans with Disabilities Act iyo sida loogu dabaqi karo hawlaha wakaaladda. Si aad u heshid macluumaad ku saabsan shirarka dadweynaha, kaalmada dheeradka iyo gelitaanka, fadlan la xariir Office of Arts & Culture, telefoonka (206) 684-7171 (codka), ama (800) 833-6388 (Isgaarsiinta TDD). Wakaaladaan waxay u hoggaansan tahay dhamaan sharciyada federaalka, gobolka iyo deegaanka ee mamnuuca takoorka xagga shaqada iyo adeegyada.

Wuxuu taageeraa xoriyadda hadalka

Magaalada waxay aaminsan tahay in bulshada fududeysa xoriyadda hadalka iyo fakarka, bulsho ahaan gaari doonto horuma. Fanaaniinta waxay kaalin muhiim ah ka cayaaraan fakarka iyo taxadiga arrimaha bulshada ee markaas jira. Xoogga Mareykanka, waddan ahaan, wuxuu ku dhisan yahay tixgelinteeda fikradaha kala duwan iyo aaraada. Taageerada Dawladda siiso fanka waa in ay si la mid ah u tixgeliso baaxadda fikradaha iyo in ay dhiiri geliso xoriyadda fakarka.